# Isuku Dubanan waxaanu Dhisayna



*"Halkaan, ayaan ku dooran karaa mustaqbalkayga."*

*"Halkaan, ayaa ah meesha ugu fiican qoyskayga."*





*"Caruurtayda halkaan ayay ku leeyihiin himilo fiican."*

## Maxaa loo Codeeyaa (Foodaa)?

Codeyntu waa xaqeena asaasiga ah, oo waxaynu u codeynaa in aan go'aamino ciddii inaga matali lahayd samanyta xeerarka aynu ku ogolaano in aynu ku wada noolaano.

## Doorashooyinku waa maxay?

Doorashada, **waxaan u codeynaa musharaxii aan doonayno** ee iska soo sharaxa degmadeena. Musharaxa ugu codadka badanaada ayaa la doortaa.

Isaga ama iyadu kadib waxay noqdaan **xubin Baarlamaanka ka tirsan**.

Wixii faahfaahin ah, la xiriir xafiiska Doorashooyinka Kanada ee degmadaada. Lambarka waxaad ka heli dontaa goobtayada internetka ama adiga oo waca lambarkayaga lacag la'aanta ah.

**www.elections.ca**

**1 800 463-6868** **(lacag la'aan)**

**Dadka dhegaha la' ama aan xoog wax u maqlin ha waceen**

**TTY 1 800 361-8935**

Elections Canada

EC90236 (0404) / Somali/Somali

## Erayada aan u baahanahay in aan ogaado

**Cod-bixiyuhu** waa qof waddani Kanada ah cimrigiisuna ka yareen18 sano maalinta doorashada.

**Musharaxiintu** waa dad doonaya in la doorto.

**Liiska Cod-bixiyeyaashu** waa magacyada dadka isu diiwaangeliyay in ay codeeyaan.

**Macluumaadka codaynta** waxaa la iigu soo diraa boosta. Waa caddeyn in magacaygu ku jiro liiska cod-bixiyeyaasha oo ii sheegaya goorta iyo meesha lagu foodayo.

**Goobta Cod-bixintu** waa meesha aan ku soo foodayo.

**Wakiilka celinta waraaqaaha codaynta** ayaa i siinaya warqadda cod-bixinta. Isaga ama iyada ayaa ka caawinaya cod-bixiyeyaashu sidii ay u calaamadeen lahaayeen waraaqahooda.

**Karaaniga afti-qaadidda** ayaa magacayga ka xariiqi doona liiska cod-bixiyeyaasha marka aan foodo.

**Warqadda cod-bixintu** waa warqad ay ku yaalaan magacyada musharaxiinta degmadayda laga soo doorto.

Cod-bixinta Kanada waxaa lagu sameeyaa **waraaq qarsoodi ah**.

**Daaha codayntu** waa goob xiran oo aan galo marka aan calaamadaynayo doorashadayda.

Marka aan calaamadeeyo waraaqdayda, waxaan ku soo celinayaa wakiilka celinta waraaqaha oo jeexa warqadda kore isaga oon furin waraaqdayda si codkaygu qarsoodi u ahaado. Kadibna waxaan ku ridi doonaa waraaqda **sanduuqa waraaqaha doorasha**.

## Doorashada – Waxaan dooranaya

Marka ay doorasho jirto, waa in boosta laygu soo diraa **Kararka Macluumaadka Cod-bixiyaha**, kaasoo xaqiijinaya in magacaygu ku jiro liiska cod-bixiyeyaasha.

Kaadhkani waa muhiim.

Waxaa ku qoran sidii, wakhtigii iyo meeshii aan ka codeyn lahaa.

Haddii aanan helin kararka, waxaan la **xiriiri doonaa Doorashooyinka Kanada** si aan u ogaado sidii aan magacayga ugu dari lahaa liiska cod-bixiyeyaasha oo aan u foodi lahaa.

**Magacyada musharaxiinta** waxaan ka ogaan karaa anigoo gala goobta internetka ee Doorashooyinka Kanada ee **www.elections.ca** xilliga doorashooyinka. Waxaan kaloo baran karaa magacyadooda iyo siyaasadahooda haddii aan dhagaysto raadiyaha, ama daawado talefishanka ama akhriyo joornaalada ama aan la sheekaysto saaxiibaday iyo qoyskaygaba. Waxaan dooran doonaa musharaxa aan doonayo in uu **wakiil iga noqdo**.

## Sidee baan u Codeeyaa?

**Saddex siyaabood ayaan u codeyn karaa.**

**Waxaan ka codeyn karaa Goobaha Afti-qaadidda ee hor-mariska ah.**

Goobaha afti-qaadidda hor-mariska ah waxaa loogu tala galay dadka aan foodi karayn ama aan doonayn in ay foodaan maalinta doorashada.

Cod-bixiyeyaasha oo dhami way ka foodi karaan goobaha afti-qaadida hor-mariska ah.

Kaadhkayga macluumaadka cod-bixiyaha ayaan ka ogaan karaa meesha iyo wakhtiyada afti-qaadidda hormariska ah ama haddii aan waco lambarka Doorashooyinka Kanada ee ku yaala kaadhkayga.

**Waxaan ku foodi karaa waraaq doorasho oo gaar ah.**

Cod-bixinta waraaqda gaarka ah waxaa lagu diri karaa boosta ama waxaa lagu sameyn karaa **xafiiska wakiilka celinta waraaqaha** ee degmadayda.

Wixii dheeraad ah waxaan la xiriiri karaa Doorashooyinka Kanada.

**Maalinta doorashada oo aan tago**.

Maalinta doorashada waxaan tagayaa goobta afti-qaadidda si aan u foodo.

Taariikhaha, wakhtiyada iyo goobaha cod-bixintu waxay ku yaalaan kaadhka macluumaadka cod-bixiyaha.

Markaan tago **Goobta Codeynta**, waxaan tagayaa miiska uu ku yaalo lambarka u eeg kan kaadhkayga foodka ku yaala. Laba wakiil ayaa fadhiya miiska: **wakiilka celinta waraaqaha iyo karaaniga afti-qaadista**.

Waxaan siin doonaa **magacayga iyo cinwaankayga** wakiilka celinta waraaqaha. Dadka badankiisu waxay ku jiraan liiska foodka.

Haddii aan ku jirin liiska cod-bixiyeyaasha, waxaan weli u leeyahay fursad in aan **isu diiwaan geliyo maalinta doorashada**. Waxaan iska diiwaan gelin karaa wakiilka celinta waraaqaha ee jooga goobta afti-qaadista oo aan siiyo **caddeyn aqoonsigayga iyo deggenaanshahayga**. Waxa kale oon keeni karaa dhaar qoran oo ku saabsan aqoonsigayga iyo deggenaanshahayga iyo qof cod-bixiye ka ah isla degmadan oo i raaca si uu markhaati iigu noqdo.

Afti-qaaduhu wuxuu ka **xariiqayaa magacayga** liiska cod-bixiyeyaasha si uu u tuso in aan fooday.

Wakiilka celinta waraaquhuna wuxuu i siin doonaa waraaqda cod-bixinta oo isku laaban.

Isla qofkaas ayaa i **caawin kara** haddii dhibaato iga qabsato calaamadaynta warqadayda.

Waxaan soo kaxaysan karaa saaxiib ama qof qoyskayga ka mid ah si uu iiga caawiyo goobta cod-bixinta.

**Waxaan daba mari daaha cod-bixinta**. Cidina ma aragto cidda aan u foodayo.

**Waxaan** ku qoray **X** goobaabinta dhexdeeda ee magaca musharaxa aan dooranayo dhinaciisa ah.

**Waan isku laabayaa waraaqdayda** si codeyntaydu qarsoodi u ahaato.

Waraaqdaydii oo isku laaban ayaan u geeynayaa wakiilka celinta waraaqaha **oo ka jeexi doona qaybta kore**.

Wakiilka celinta waraaqaha ayaa ii soo celin doona waraaqdaydii codeynta.

**Waxaan ku ridi doonaa waraaqdayda sanduuqa waraaqaha codaynta**.

